

Sida loogu kala sooco guriga qashinkaaga

Weelka bunniga ah

U isticmaal weelka bunniga ah cuntada qashinka ah oo kaliya. Waa inaad ka saarto wixii caag, waraaq ama baakad ah kahor inta aadan ku ridin cuntada kiishka waraaqda ah ee bunniga ah. Kaliya isticmaal kiisha waraaqda ah ee aanu ugu talogalnay cuntada qashinka ah. Cuntada qashinka ah waxa loo isticmaalaa in lagu soosaaro bayogaas (gaas) iyo bayo fertilaysar (bacrimiye).

- Miraha iyo khudaarta
- Waraaqaha la isku nadiifiyo ee duuban
- Rootiga
- Kufayga kafeega
- Lafaha hilibka iyo kalluunka
- Galka baradhada
- Ubaxyada go'an



Balaastiiga waaka mamnooc inlagurido weelka bunniga ah.

Weelka cagaarka ah

U isticmaal weelka cagaarka ah inaad ku riddo wixii kasta oo soo hara kadib markii aad ka soocdo baakadaha, cuntada qashinka ah iyo qashinka waxyaalaha halista leh. Tan waxa loo yaqaan qashinka guud. Tan waa la gubaa si looga helo kul iyo koronto.

- Sakiinadaha
- Furarka
- Xafaayadaha
- Xashiishka bisadda ee la isticmaalo
- Cadayada
- Haashka sigaarka
- Tambuunada (shayada caadada la iskaga basriyo)
- Dunta ilkaha lagu nadiifiyo
- Qashinka nadiifinta
- Qalimada khadka
- Kondhomyada
- Buuriga la ursado
- Saliidda cuntada lagu kariyo



La geeyaa meesha dadku ka shaqeeyaan ee xarunta dib u warshadaynta

Ma jiraan wax kharash ah oo dheeraad ah oo lagaa qaadayaa, qof ahaan, marka la eego u qaadista qashinka badan iyo ka halista ah xarunta dib u warshadaynta. Waxa kharashku ku jiraa ka aad ku bixiso qaadista qashinka ee guriga.

Qashinka badan

- farnijarka duugga ah
- baaskiiladaha
- mararka jajaban
- qashinka beerta

Dib u isticmaalka

Waxaad uga tagi kartaa shayada cusub ee nadiifta ah in dib u isticmaalo xarumahayaga dib u warshadaynta.

Qashinka halista leh

Marka aad gayso qashinkaaga halista leh xarunta dib u warshadaynta, waxaanu hubinaa in loo maareeyey qaab deegaanka aan wax u dhimayn.



Dharka iyo maryaha

Dhammaan dharka iyo maryaha, xiitaa kuwa madhay ee uskagga leh, waa in isku meel lagu ridaa. Wixii dib loo isticmaalayo iyo waxa dib loo warshadaynaynayo marxlad dambe ayaa lagu kala soocaa.



- heerkulbeegyada meerkuriga ah
- haraayada ranjiga
- haraayada milayaasha
- qubashada saliidda
- waxyaalaha quruxda loo gashado
- guluubyada laydhka ee aan dabka badan cunin
- laambadaha laydhka ee dhaadheer
- baatariyada

Shayada leh xarig ama baatari.

- shooldaha iwm
- tallaagadaha
- kombiyuutarrada
- suxuunta TV-ga
- taleefanada gacanta
- qalabka kafeega lagu sameeyo



**NORDANSTIGS
KOMMUN**

nordanstig.se/avfall

Jaraa'iddada iyo baakadaha

Kuwan waxa lagu kala soocaa oo lagu ururiyaa xaruntaada dib u warshadaynta, xarunta dib u warshadaynta ugu dhaw.

Baakaduhu waa inay madhan yihiin waana inayna lahayn wax halis xagga fayodhawrka ah. Cadaadi!



BAAKADAHA WARAAQDA AH

- Waraaqaha suuliga
- Baakadaha baastada
- Baakadaha caanaha
- Kiishashka sonkorta
- Waraaqaha hadiyadaha lagu duubo
- Kartoonada kabaha
- Kartoonada ukunta

Waa in furka laftiisa aad ka furto oo aad ku riddo weelka loogu talagalay baakadaha caagga. Qaybta caagga ah ee baakadda ku harta waa la iskaga tagi karaa. Waxa gaar looga sooci waraaqda marxalad dambe ee hannaanka dib u warshadaynta.



BAAKADAHA CAAGGA AH

- Dhalooyinka dhaambooga
- Madiibadda jiiska
- Bacaha
- Kiisashka siddaha leh
- Baakadaha kafeega
- Xaashiyaha caagga ah
- Baakadaha dib u buuxinta
- Weelka cuntada safaariga



BAAKADAHA QURAAARADDA AH

- Dhalooyinka afka ballaadhan
- Dhalooyinka afka dhuuban

Xasuusnaw in shayada midabka leh iyo kuwaan midabka lahayn midba gaarkiisa loo sooco!

Furarka birta ah ee la wareejiyo waa in laga furo dhalooyinka, laakiin birta ku xiran waa lagu dayn karaa. Kurka dhalooyinka waa la soocaa birta dhalada ku xiranna si gaar ah ayaa dib loogu warshadeeyaa.



BAAKADAHA BIRTA AH

- Daasadaha birta ah
- Xaanshi bireedka aluuniyaam
- Tuumbooyinka Caviar
- Kaabsulada birta ah

U daa dhammaan baakadaha birta ah dib u warshadayn. Xiitaa shayada yaryar sida kaabsulada, furarka iyo furarka la wareejiyo. Baakadaha oo dhan waa muhiim.

Isku cadaadi intii xooggaaga ah tuumbooyinka biraha ah, furka ku daa si aadan qurmuun u arag, oo ku rid tuumbada weelka baakadaha birta lagu rido.



JARAA'IDDADA


- Majaladaha
- Diiwaanada
- Xayeysiiska
- Waraaqaha sawirka

Ka saar dahaarka caagga ah jaraa'iddada iyo agabka xayeysiiska, oo u dhaaftan dib u warshadayn maadaama ay caag tahay.

Qardhabta waraaqaha, biraha dhuudhuuban iyo wixii la mid ah uma baahna in laga saaro jaraa'idka ama buushashka. Waxa lagu kala saaraa birlab waxaana loo diraa dib u warshadaynta birta.

Hel dhawr gambo

Shayadan aad rabto inaad iska tuurto waxa jiri kara qaar kamid ah oo qiime u leh dadka kale. Xayeysii, ku iibi suuqa alaabta duugga ah, dadka iska sii ama urur samalfal sii.



Baakadaha iyo Jaraa'iddada Ururintooda (FTI)

Ka masuul ah dhammaan xarumaha dib u warshadaynta ee Sweden. Booqo www.ftiab.se haddii aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato waxa ku dhaca baakadaha aanu dib u warshadayno. www.ftiab.se

Geesiga bey'adda

Waxa ugu fiican bey'adda iyo jeebkaagu waa inaad kiraysato, samayso, amaahato, dayactirto, iibsato oo aad gaddo shayada duugga ah. Sidaas haddaad yeesho, wax qashin ah jiri maayo!



NORDANSTIGSKOMMUN

nordanstig.se/avfall